Metro Health

MUTAYSIGA KAALMADA DHAQAALE					
Qaybta	**PFS**	Lambarka Sihuruucdii Hore	**PFS-D151**	**Lambarka Shuruucda**	**PFS-03**
Taariikhda Hore	Juun 2004	Taariikhda dhaqangalka	Maarso 2019	Dib-u-eegista Xigta	Maarso 2020

Δ muujisaa <u>isbeddel</u>

Bayaanka Shuruucda a

Metro Health Corporation iyo Metro Health Hospital (la isku dhaho, "Metro") waa ururro aan macaash-doon ahayn, cashuur aan laga qaadin oo leh hadaf khayri ah oo ah inay siiyaan adeegyada gurmadka iyo daryeeylka caafimaadka daruuriga ah degganayaasha mandaqadda adeegga koowaad iyo labaad ee Metro, iyada oon la eegayn xaaladda dhaqaale iyo qofku inuu iska bixin karo. Ujeedada Shuruucdan Kaalmada Dhaqaale waa in la hubiyo in hababka iyo hannaanadu ay u jiraan aqoonsiga iyo kaalmaynta bukaanada laga yaabo in la siiyo daryeel bilaa lacag ama loo sameeyo qiime-dhimis u dhiganta khayraadkooda dhaqaale iyo awooddooda iska bixin. Shuruucdan waxay khuseeyaan dhammaan goobaha Metro Health Corporation iyo Metro Health Hospital.

Hal-Ku-Dhegyada

Mutaysi, Tilmaamaha Saboolnimada, Daryeelka Khayriga ah, kharshka bukaanka

Baaxada

Diiwaangalinta Bukaanka, Adeegyada Kahor Imaanshaha, Waaxda Michigan ee Adeegyada Aadanaha, Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka, Adeegga Macmiilka, Qaabsheegadka Xirfadaysan . (Loogu talogalay dhammaan goobaha Metro Health Corporation iyo Metro Health Hospital.)

Guud

Si ay u sii kordhiso himiladeeda khayriga ah, Metro waxay bixin doontaa (i) daawaynta xaaladda gurmadka qof kasta oo u baahan daryeel; iyo (ii) adeegyada daryeelka caafimaadka daruuriga ah ee bukaanada si rasmi ah udeggan Gobolka Michigan (iyo kuwa kale qaab ku salaysan kiis-calaa-kiis ah) kuwaasi oo buuxinaya xaaladaha iyo shuruudaha siyaasaddan ay dhigayso; xaalad kasta, iyada oon la eegayn awoodda bukaanku u leeyahay inuu iska bixin karo kharashka daryeelkan.

Waaa siyaasadda Metro inay siiso kaalmo dhaqaale (daryeel ha noqdo mid bilaash ah ama mid qiime-dhimis lagu sameeyey) shaqsiyaadka ama qoysaska halka: (i) caymiska caafimaadku uu xaddidan yahay ama aanu jirin; (ii) bukaanku uu ku guuld daraystay inuu u-qalmo kaalmada dawladda (tusaale ahaan, Medicare ama Medicaid); (iii) bukaanku uu kala shaqeeyo Metro bixinta macluumaadka la codsaday ee muujinaya baahida dhaqaale, ama xaqiiqooyin ama duruufo kale oo si dhakhso ah u muujinaya baahi dhaqaale; iyo (iv) Metro ay go'aan ku qaadato in kaalmo dhaqaale ay habboon tahay marka la eego awoodda bukaanka ee ah inuu awoodo inuu iska bixin karo kharashka (sida lagu caddeeyey dakhliga qoyska ama kusalaysan shuruudo muujinaya mutaysi male ah) iyo xajmiga qaamaha caafimaadka bukaanka.

Madaxa Maaliyadda Metro ayaa yeelanaya awoodda ugu dambaysa isticmaalka shuruucda iyo dhammaan go'aanada kaalmada dhaqaale. Kadib marka Metro go'aamiso in bukaanku uu mutaystay kaalmo dhaqaale, Metro waxay go'aamin xaddiga kaalmada dhaqaale ee uu heli karo bukaanku iyada oo laga faa'idaysanayo Tilmaamaha Kaalmada Dhaqaale (ku diyaarsan **<u>lifaaqa A</u>**). Tilmaamuhu waxay sheegayaan heerarka dakhliga qoyska oo ku xidhan Tilmaamaha Saboolnimada Fadaraalka ee ugu dhawaa, waxayna sameeyaan boqolayda qiime-dhimista taasoo udhiganta dakhliga qoyska. Waa in Tilmaamaha loo habeeyo si

sannadle ah si ay u muujiyaan isbeddelka sannadka ee Tilmaamaha Saboolnimada Fadaraalka, iyo in boqolayda qiime-dhimistu waafaqay dakhliga si loo hubiyo in, xaaladaha oo dhan, bukaan la go'aamiyey inuu mutaystay kaalmada dhaqaale aan lagu dallici doonin lacag ka badan tan sida qaalibka ah ay Metro ku dallacdo adeegyada xaaladda gurmadka ama caafimaad ahaan daruuriga ah ee la siiyo shakhsiyaadka leh caymis daboolaya daryeelka noocan ah.

Metro si caadi iah ayey dib ugu eegi doontaa Shuruucda Kaalmada Dhaqaale si ay u hubiso in had iyo jeer ay: (i) muujiso himilada Metro; (ii) sharraxdo hababka go'aanka ee qofka laga yaabo inuu mutaystay kaalmada dhaqaale iyo xaddiyada ay mutaystay; iyo (iii) inay raacdo dhammaan shuruucda, xeerarka, iyo qawaaniinta gobolka iyo fadaraalka ee khuseeya marka la eego siinta kaalmada dhaqaale la siinayo bukaanada aan caymiska lahayn ama haddii kale mutaystay.

Takoor La'aan

A. Metro waxay bixin doontaa adeegyada daryeelka caafimaadka, bukaan-jiif iyo bukaan-socod, dhammaan degganayaasha Michigan ee u baahan daryeel xaaladda gurmadka deg degga ah ama daruuri ah caafimaad ahaan, iyadoon la eegayn awoodda bukaanku uu uleeyahay inuu iska bixin karo kharashka adeegyadan iyo iyada oon la eegayn haddii iyo ilaa xadka bukaanadan laga yaabo inay u-qalmaan kaalmada dhaqaale iyadoo la raacayo shuruucdan .

B. Metro ku kici mayso ficillo ka niyadjabinaya shaqsiyaadku inay raadsadaan daryeelka caafimaadka deg degga ah, sida iyadoo ka dalbaysa in waaxda gurmadka bukaanadu bixiso kahor helista daryeelka ama ama iyadoo oggolaanaysa hawlaha ururinta daynta ee waaxda gurmadka ama meelaha kale ee hawlaha noocan ah ay rabshi karaan ku bixinta daryeelka gurmadka qaab takoor la'aan ah.

Mutaysiga Kaalmada Dhaqaale

A. Kaalmada dhaqaale waxa lagu bixin doonaa adeegyada gurmadka ama caafimaad ahaan daruuriga ah ee bukaanada dhaqaale ahaan mutaystay ama caafimaad ahaan faqiirka ah (labada xaaladoodba, kusalaysan macluumaad lagu bixiyey Codsiga Kaalmada Dhaqaale ee lifaaqan sida **Lifaaqa B**), ama bukaanada la go'aamiyey inay fikir ahaan mutaysteen. Sidoo kale, kaalmada dhaqaale waxa laga yaabaa in lagu bixiyo siyaabo kale kuwaasoo ku salaysan qaab kiis-calaa-kiis ah marka uu go'aamiyo Madaxa Maaliyadda Metro (ama agaasimayaasha sare ee kale marka la eego arrimaha dhaqaale, iyada oon la eegayn mansab) marka uu ku qancdo.

B. Go'aaminta u-qalmidda kaalmada dhaqaale waxay dabooli doontaa adeegyo ay ku bixiso Metro qaab bukaan-jiif ama bukaan-socod ah. Ujeedooyinkan dartood, siyaasaddu sidoo kale waxay dabooshaa bixinta adeegyo xirfadaysan oo ay qabtaan dhakhaatiir iyo bixiyayaal kale oo ay toos u shaqaalaysiisay Metro iyo sidoo kale adeegyo xirfadaysan oo kale oo ay qabtaan dhakhaatiir iyo bixiyayaal kale oo daryeel ka bixiya Metro, kuwaasi oo dhammaantood kaqaybqaata bixinta daryeelka gurmadka iyo/ama caafimaad ahaan daruuriga ah ee Metro una oggolaaday inay daboosho siyaasaddani, laga reebo bixiyayaasha ku qoran **https://metrohealth.net/about-metro-health/billing-payment-options/financial-assistance/**.

C. Halka ay suurogal tahay, kahor oggolaanshaha ama siinta adeegga, Wakiil Metro ka tirsan ayaa waraysi la yeelan doona bukaanka, dammiinka, iyo/ama wakiilkiisa kale ee sharciga ah. Haddii waraysi aanu suurogal ahayn kahor oggolaanshaha ama bixinta adeegga, waraysiga waa in lagu sameeyaa oggolaanshaha ama sida ugu dhakhso badan ee suurogal ah. Xaaladda oggolaansho marxalad gurmad ah, qiimaynta beddelada lacag-bixinta waxaa laga yaabaa inayna dhicin ilaa in daryeelka caafimaad ee loo baahan yahay la bixiyo maahane.

D. Wakhtiga waraysigii hore ee bukaanka, Wakiilka Metro wuxuu uruurin macluumaadka dimugaraafiga ah ee caadiga ah iyo macluumaad la xidhiidha dhammaan caymiska ciddii saddexaad ee jira. Xaaladaha bukaanku uu leeyahay caymiska cidda saddexaad oo xaddidan ama aan jirin, Wakiilka Metro wuxuu go'aamin haddii bukaanku u-qalmo kaalmada caafimaad ee khayraadka dhaqaale ee kale ee jira sida Medicare, Medicaid, ama barnaamijyada kale ee gobolka iyo fadaraalka. Wakiilka Metro wuxuu noqon doonaa mid la heli karo si uu uga kaalmeeyo bukaanka iska qorista barnaamijyada dawladdu lacagta ku bixiso ee laga yaabo inay jiraan. Haddii bukaanku diido inuu codsado ama bixiyo macluumaadka daruuriga u ah habsocodka dalabka, wuxuu noqon doonaa mid aan mutaysan kaalmada dhaqaale sida uu sharcigani dhigayo. Haddii codsiga khayraadka kaalmada dhaqaalaha caafimaad ee sare ku xusan la diido, aanu ku fillayn, ama hore loo diiday, tixgalinta kaalmada dhaqaale ayaan markaa la siin doonaa.

E. Dhammaan bukaanada aan lahayn caymis ama lacag-bixinta dhinaca saddexaad oo kale waxa si otomaatig ah loo siin doonaa Qiime-dhimista talska-Bixinta. Qiime-dhimista Iska-Bixinta waa la beddeli doonaa haddii bukaanka mar dambe la go'aamino inuu mutaystay kaalmada dhaqaale sida ay dhigayaan tilmaamaha dakhliga kusalaysan, xaaladdaas oo qiime-dhimista kaalmada dhaqaale ee hoose lagu sharxay ay khusayn doonta halkii Qiime-dhimista Iska-Bixinta. Qiime-dhimista Iska-Bixinta waa la habayn doonaa marka loo baahdo si loo hubiyo in bukaanada iska-bixinta aan laga qaadin lacag ka badan tan sida qaalibka ah ay ku soo dallacdo ("AGB") Metro.

F. Xaaladaha caymiska dhinaca saddexaad (oo ay ku jiraan caymiska gaarka ah ama lacag-bixinta barnaamijka dawladda) aanu jirin ama u dhaw yahay inaanu ku fillayn, Wakiilka Metro wuxuu ku wargelin doonaa bukaanka jiritaanka Kaalmada Dhaqaale. Bukaanada raadinaya kaalmada dhaqaale waxa loo sheegi doonaa inay dhammaystiraan Codsiga Kaalmada Dhaqaale ee ugu lifaaqan **Lifaaqa B** shuruucdan. Nuqullada foomka codsiga waxa laga heli karaa Wakiilka Metro iyo barta internetka https://metrohealth.net/ about-metro-health/billing-payment-options/financial-assistance/ Codsiyada a waxa laga yaabaa inuu toos u dhammaystiro bukaanku, damiinka bukaanka iyo/ama wakiilka sharciga ah, ama Wakiilka Metro iyadoo la eegayo macluumaadka laga keenay wax kamid ah waxa hore iyadoo la adeegsanayo waraysi toos ah ama taleefan ah, ama macluumaad la isku-hallayn karo oo qoraal lagu bixiyey. Haddii loo baahando ururinta macluumaadka daruuriga ah ama agabka la codsaday kaqayb ahaan habsocodka u-qalmidda Kaalmada Dhaqaale, bukaanada waxa lagu booriyaa inay kala xidhiidhaan wakiilada Metro oo tabobaran (616) 252-7110 of 1-800-968-0051. Wakiilada Metro sidoo kale waxa laga yaabaa inay ka kaalmeeyaan bukaanada qiimaynta xaaladahooga dhaqaale, ururinta macluumaadka ay codsatay Metro, iyo ka kaalmaynta shaqooyinka la midka ah.

G. Bukaanada dhammaystiraya Dalabka Kaalmada Dhaqaale waa inay ku soo celiyaan foomka saxeexan iyagoo isticmaalaya wax kamid ah tallaabooyinka soo socda:

- Gacanta aad ku keento foomka La-taliyaha Dhaqaalaha ama Qasnajiga jooga Metro Health Hospital Lobby ama Miiska Diiwaangalinta Bukaanka.
- Warqadda ku hagaaji Metro Health Hospital: Customer Service Representative, PO Box 913 Wyoming, MI 49509-0913
- Iimeyl ugu dir foomka CustomerService@metrogr.org

Codsiyada Kaalmada Dhaqaale waa la tixgalin doonaa haddii la helo wakhti kasta oo kamid ah inta lagu jiro muddada 240-ka maalmood ah ee ku xigta bayaanka qaansheegashada cusbitaal ka saarista koowaad kadib kaasoo ay Metro siisay bukaanka daryeelka noocan ah.

H. Mutaysiga kaalmada dhaqaale waxa shardi u ah ku bixinta bukaanka ee macluumaad dhammaystiran oo sax ah Dalabka Kaalmada Dhaqaale ee ku diyaarsan **Lifaaqa B**, iyo iskaashiga wakhtiga ku habboon ah ee inta habsocodka dalabka kaalmada dhaqaale jiro. Iyadoo eegaysa go'aaminta mutaysiga bukaanka ee kaalmada dhaqaale, Metro codsan mayso macluumaad aan ahayn ka lagu sheegay **Lifaaqa B**, in kastoo bukaanadu si iskaa ah ay u bixin karaan macluumaad dheeraad ah oo ay rumaysan yihiin inuu xidhiidh la leeyahay mutaysiga. Haddii Metro ay la soo xidhiidho bukaanka si ay uga codsato macluumaad maqan, bukaanku wuxuu haysantaa muddo 30 maalmood ah inuu ku jawaabo. Ku guuldaraysiga ku jawaabista muddada 30-ka maalmood ah waxay keeni doontaa in Codsiga la ga hakiyo in hawshiisa la sii wado; bukaanku waxa laga yaabaa inuu dib ugu hawlgaliyo Codsiga haddii uu dhiibo macluumaadka la codsaday wakhti kasta oo kamid ah inta lagu jiro muddada 240-ka maalmood ah ee ka dambeeya bayaanka cusbitaal ka saarista kadib kaasii ay Metro siiso bukaanka daryeelka noocan ah. Haddii bukaanku bixiyo macluumaad aan sax ahayn ama marin-habaabin ah, waxa loo qaadan doonaa inaanu mutaysan kaalmada dhaqaale, sidaa darteedna, waxa laga yaabaa in laga filo inuu qaantiisa iska bixiyo.

I. Marka Codsiga Kaalmada Dhaqaale oo dhammaystiran la helo, Wakiilka Metro ayaa dib-u-eegi doona codsiga . Bukaanada la go'aamiyo inay fikir ahaan u mutaysteen waa laga hawlgali doonaa kaalmada dhaqaale iyada oon looga baahnayn dhammaystirka Codsiga Kaalmada Dhaqaale ama macluumaad kale oo dheeraad ah bukaanka.

J. Bukaanada aan caymiska lahayn una qalmin kaalmada dhaqaale waxa laga yaabaa inay la xidhiidhaan Metro si ay ugala hadlaan ikhtiyaarada lacag-bixinta, oo ay kujiraan jiritaanka qorshe lacag-bixin kaasi oo kama-dambaysta lagu maamuli doono Barnaamijka Lacag-bixinta Daryeelka Metro. Wakiilada Metro waxay ku wargelin doonaan bukaanadan noocan ah wax alla wixii kale ee qiime-dhimis ah ee laga yaabo inay heli karaan sida ay dhigayaan shuruucda Metro.

Go'aaminta iyo Ogaysiinta la Xidhiidha Kaalmada Dhaqaale

A. Xaaladaha bukaanada la go'aamiyo inay dhaqaale ahaan mutaysteen kaalmada dhaqaale, bukaanada dakhliga qoyskoodu yahay ama ka hooseeyo 175%Tilmaamaha Saboolnimada Fadaraalka ee wakhtigan waxay heli 100% dhimitaan ah qaybta bukaanka ee khidmadaha la soo dallacay (*sida*, ka masaxid buuxda), sida ku cad **Lifaaqa A**. Bukaanada dakhliga qoyskoodu u dhexeeyo 176% iyo 250% Tilmaamaha Saboolnimada Fadaraalka ee wakhtigan waxay heli doonaan qiime-dhimis isla bedbeddelaysa qaybta

bukaanka ee khidmadaha la soo dallacdo, sida ku cad **Lifaaqa A**. Xaaladda bukaanada la go'aamiyo inay caafimaad ahaan baahan yihiin, qiime-dhimista habboon ayuu go'aansan Wakiilka Metro. Maareeyaha Xisaabaha Bukaanka iyo Madaxa Maaliyaddu waxa laga yaabaa inay kiis-calaa-kiis dib ugu eegaan. Bukaanada la go'aamiyo inay fikir ahaan mutaysteen kaalmada dhaqaale waxay heli doonaan dhimitaan 100% khidmadaha (ka masaxid buuxda).

B. Boqolkiiba inta qiime-dhimis khusaysa ee **Lifaaqa A** ayaa lagu isticmaali doonaa khidmadaha guud kuwaasoo haddii kale lagu dallici kari lahaa bukaanka. Qiime-dhimista noocan ah waxa loo abuuray qaab loogu talogalay in la raaco sharciga Fadaraalka ee khuseeya, kaasi oo ka mamnuucaya Metro qaan u sheegadka bukaan mutaystay kaalmada dhaqaale lacag ka badan ta sida qaalibka ah ay ku soo dallacdo ("AGB") Metro bukaanada leh caymiska dhinaca saddexaad, oo la xisaabiyey xaaladdan iyadoo la adeegsanayo habka dib-fiirinta ee ku cad Qawaaniinta Qasnajiga khuseeya, iyadoo la tixgalinayo lacagaha ay oggolaatay Medicare iyo bixiyayaasha ganacsi inta lagu jiro muddada 12 biloodka ah. Boqolkiiba qiime-dhimista ku cad **Lifaaqa A** waxa laga yaabaa in la beddelo markii muddo la joogaba (iyo ugu yaraan si sannadle ah) si loo hubiyo in boqolleydani ay waafaqsan tahay heerarka hore ee uu dhigayo sharciga Fadaraalku; wixii isbeddelo noocan ah waa lagu dhaqangalin doonaa iyadoo la adeegsanayo lifaaqa **Lifaaqa A** ee la cusboonaysiiyey ee Siyaasaddan, taasi oo uu saxeexi doono taariikhayn doonana Madaxa Maaliyadda Metro. Metro waxay bilaabi doontaa isticmaalka boqolleyda qiime-dhimista cusub inta ka horraysa 120 maalmood kadib dhammaadka muddo cabbiraad 12 bilood ah taasi oo AGB-ga Metro uu habeeyey xisaabiyeyna. Sidoo kale, khidmadaha bukaanada aan caymiska lahayn ee ka hooseeya 250% Tilmaamaha Saboolnimada Fadaraalka ee wakhtigan waxay ku xadidnaan doonaan wax aan ka badnayn 115% inta Medicare oggoshahay marka la eego shuruudaha Caafimaadka Michigan ee Gobolka Michigan.

C. 60 Maalmood gudahood kadib gudbinta Codsiga Kaalmada Dhaqaale ee dhammaystiran, Metro waxay go'aamin doontaa haddii bukaanku u-qalmo kaalmada dhaqaale iyadoo la eegayo mutaysiga dhaqaale ama baahida caafimaad waxayna go'aankan ka ku ogaysiin doontaa bukaanka qoraal iyo xaddiga qiime-dhimista la siinayo. Ilaa in uu haddii kale go'aamiyo Madaxa Maaliyaddu ma ogiye, Metro ma aha inay ogaysiiso bukaanada la go'aamiyey inay u-qalmaan kaalmada dhaqaale ee kusalaysan mutaysiga malaha ah. Marka ay dhacdo in Metro go'aamiso bukaan *inaanu* u-qalmin kaalmada dhaqaale, Metro waxay go'aanka ku ogaysiin doontaa bukaanka qoraal noocan ah, oo ay kujiraan waxa loo cuskaday diidmada.

D. Marka laga reebo sida hoos ku cad, dhammaan go'aamada kusaabsan u-qalmidda kaalmada dhaqaale waxay sii wadi doonaan inay shaqeeyaan muddo 6 bildood ah laga bilaabo taariikhda adeegyada iyadoo ku xidhan go'aaminta. Sidaa darteed, haddii bukaan u qalmo kaalmada dhaqaale 6dii bilood ee u dambeeyey gudahooga oo duruufaha dhaqaale ee bukaanka, xajmiga qoyska, iyo caymisku ayna isbeddelin, bukaanka waxa loo qaadan inuu u-qalmo kaalmada dhaqaale iyadoo la eegayo daryeel dheeraad ah oo xaalad gurmad ama caafimaad ahaan daruuri ah, iyada oon la gudbinayn Codsi cusub ee Kaalmada Dhaqaale. Hase yeeshee, haddii bukaan uu u-qalmo kaalmada dhaqaale laakiin wax iska beddelaan maalka uu haysto ama duruufihiisa dhaqaale iyo/ama xaaladda caymiska taasi oo saamayn karta u-qalmidda kaalmada dhaqaale, bukaanka waxa laga fili doonaa inuu gaadhsiiyo isbeddelkaas Metro 30 maalmood gudahood ama, xilli kasta, inta ka horraysa helista adeegyo daryeelka caafimaad oo kale. Taas beddelkeeda, waxa laga

yaabaa Metro inay codsato cusboonaysiinta macluumaadka lagu bixiyey Codsiga Kaalmada Dhaqaale, iyadoo eegaysa macluumaadkan cusubna, laga yaabaa inay dib-u-qiimayso sii socoshasha u-qalmidda ee bukaanka.

Raadka ay ku leedahay Qaansheegadka iyo Habsocodka Ururinta

A. Bukaanada u-qalma daryeelka qiime-dhimista leh, laakiin aan u qalmin ka bilaashka ah, waxa lagu ogaysiin qoraal wixii baaqi lagu leeyahay. Bukaanka waxa laga yaabaa in la waydiisto inuu ballan ka qabsado Wakiil Metro si uu u qorsheeyo shuruudaha lacag-bixinta kuwaasi oo kama-dambaysta lagu maamuli doono Barnaamijka Lacag-bixinta Daryeelka Metro. Wixii baaqiyo hadhsan ah waxa loo waajihi iyadoo la raacayo siyaasadaha Xisaabaha Bukaanka ee la xidhiidha baaqiyada iska-bixinta.

B. Marka ya dhacdo bukaan inuu u-qalmo kaalmo dhaqaale laakiin uu ku guuldaraysto inuu wakhtigii loogu talogalay ku bixiyo lacagta ku hadhsan (oo ay kujiraan, haddii ay khusayso, sida ay dhigayaan shuruudaha qorshaha lacag-bixinta lagu heshiiyey), Metro waxa laga yaabaa inay qaaddo wax kamid ah tallaabooyinka ku xusan Shuruucda Qaansheegadka iyo Ururinta Daynta ee Metro, taasi oo nuqul kamid ah laga heli karo barta internetka https://metrohealth.net/about-metro-health/billing-payment-options/financial-assistance/. Si waafaqsan Siyaasadda Qaansheegadka iyo Ururinta Daynta, Metro qaadi mayso wax tallaabooyin dayn ururin ah oo caadiga ka baxsan (sida ku cad Siyaasaddaas) iyada oon marka hore samaynayn dedaalo macquul ah si ay u go'aamiso mutaysiga bukaanka ee kaalmada dhaqaale iyadoo la raacayo shuruucdan.

Daabacaadda

A. Waa siyaaasadda Metro in jiritaanka iyo shuruudaha Shuruucdan Kaalmada Dhaqaale laga yaabo in laga dhigo mid si ballaadhan ay u heli karaan degganayaasha mandaqadaha adeegga koowaad iyo labaad ee Metro. Intaa hore waxa dheer, Metro waxay isticmaali doontaa oo ay si ballaadhan u qaybin doontaa lifaaqa guudmarka luuqadda fudud ku qoran ee ku lifaaqan **Lifaaqa C** ee Shuruucdan. Nuqullada guudmarkan luuqadda fudud ku qoran (i) waxa lagu dari doonaa agabka diiwaangalinta bukaanka iyo buug-gacmeedka bukaan-jiifka, (ii) waxa la siin doonaa bukaan kasta kaqayb ahaan qaabilaadda ama saarista, iyo (iii) waxa la soo galin doonaa websaytka Metro, iyadoo ay la jiraan Shuruucda n iyo CodsigaKaalmada Dhaqaale, meel caan ah oo si fudud looga helo karo. Guudmarka luuqadda fudud ku qoran waxa lagu heli karaa Ingiriisi iyo luuqad kale oo kasta taasi oo ah luuqadda koowaad ee in kayar (i) 1,000 qof, ama (ii) 5% dadwaynaha mandaqadaha adeegga koowaad iyo labaad ee Metro.

B. Metro waxay si shaac ah ugu dhejin doontaa, meelaha Oggolaanshaha iyo Diiwaangalinta Bukaanka iyo sidoo kale Waaxda Xaaladda Gurmadka, boodhadh sheegaya macluumaad la xidhiidha helitaanka kaalmada dhaqaale oo sharxayana habsocodka dalabka. Boodhadhka noocan ah waxa ku qornaan doona weedhaha soo socda: *Waxa laga yaabaa inaad mutaysatay kaalmada dhaqaale sida ay dhigayaan shuruudaha iyo xaaladaha cusbitaalku uu ku siiyo bukaanada u-qalma. Macluumaad dheeraad ah, la xidhiidh Xafiiska Wakiilka Metro (616-252-7110) ama 1-800-968-0051.* Calaamadahani waxay ku qornaan doonaan Ingiriisi iyo luuqad kale oo kasta taasi oo ah luuqadda koowaad ee in kayar (i) 1,000 qof, ama (ii) 5% dadwaynaha mandaqadaha adeegga koowaad iyo labaad ee Metro. Calaamadahan waxa lagu dhejin doonaa Rugaha Metro iyo meelaha kale ee dhammaan xarumaha Metro iyagoo bixinaya aragti macne leh.

C. Metro waxay ku sababi doontaa bayaan qaansheegad oo kasta oo loo dirayo bukaan inay kujirto bayaan shaac ah oo la xidhiidha jiritaanka kaalmada dhaqaale, oo ay kujiraan (i)

lambar taleefan oo loogu talogalay in la soo waco si loo ogaado macluumaad kusaabsan siyaasaddan iyo habsocodka dalabka, iyo (ii) cinwaan websayt halkaasi ooshuruucdan, Codsiga Kaalmada Dhaqaale, iyo guudmarka luuqadda fudud ku qoran laga heli karo. Sida ku cad Shuruucda Qaansheegadka iyo Ururinta Daynta, haddii Metro ugu talogasho inay qaadotallaabo ka baxsan dayn ururinta caadiga (sida ku cad Shuruucda Qaansheegadka iyo Ururinta Daynta), Metro waxay hubin doontaa in ugu yaraan hal bayaan qaansheegadka uu kujiro nuqulka guudmarka kaasoo ku qoran luuqadda fudud an ee Shuruucdan Kaalmada Dhaqaale, sida ku cad **Lifaaqa C**, iyadoo nuqulkan la bixinayo ugu yaraan 30 maalmood kahor qaadida tallaabada dayn ururinta caadiga ka baxsan ee la filayo.

Miisaanyad-dejinta, Diiwaan-haynta, iyo Tabinta

A. Madaxa Maaliyadda wuxuu hubin doonaa in kaalmo dhaqaale oo macquul ah, taasoo ay kujiraan kuwa bilaashka ah iyo kuwa qiime-dhimista leh, in lagu daray miisaanyadda hawlgalka sannadka ee Metro. Xaddiga miisaanyadda loogu talogalay u shaqayn mayso bar-joogsi marka la eego bixinta kaalmada dhaqaale, laakiin waxay u shaqayn doontaa saadaal si gacan looga gaysto qorshaynta qoondaynta khayraadka.

B. Metro waxay ku sababi doontaa Codsiyada Kaalmada Dhaqaale ee dhammaystiran (oo ay la socdaan macluumaadka xoojinta u ahaa ee la rabay) si loo joogteeyo diiwaanada Xafiiska Adeegga Macmiilka. Diiwaanadan sidoo kale waxay uga tarjumi doonaan macluumaadka sidii in codsiyadan la oggolaaday ama la diiday, iyadoo ay la socoto qaadista wixii codsiyo dib loo eegayo.

C. Kaalmada dhaqaale ee ay Metro bixiso iyadoo la raacayo Siyaasaddan waxa loo xisaabin doontaa loona tabin sannadle sida uu dhigayo sharciga khuseeya. Laga reebo sida haddii sidaa si ka duwan la oggolaaday iyadoo la eegayo xaaladda, Metro waxay tabin doontaa kaalmadeeda dhaqaale ee ku aaddan bukaanada u-qalma sida ay dhigayso siyaasaddan iyadoo la isticmaalayo kharashka dhabta ah ee adeegyada la bixiyey iyadoo la eegayo wadarta saamiga kharashka-ka-khidmadda oo laga keenayo warbixinta kharashka Medicare-ta Metro (mana aha khidmadaha dhabta ah ee adeegyada).

Qarsoodiga

Metro waxay aqoonsan tahay baahida kaalmo dhaqaale in laga yaabo inay bukaanada utahay arrin xasaasi ah ama arin shakhsiyeed aad uqoto dheer. Qarsoodinimada macluumaadka iyo ilaalinta sharafta qofka waa la joogtayn doonaa dhammaan kuwa raadsanaya kaalmada dhaqaale iyadoo la raacayo Siyaasaddan. Jiri mayso macluumaad laga helay codsiga kaalmada dhaqaale ee bukaanka in laga yaabo in la fasaxo laga reebo marka uu bukaanku oggolaado ama haddii kale sharcigu dhigayo.

Macluumaadka / Tabobarka Shaqaalaha

A. Metro waxay ku sababi doontaa dhammaan shaqaalaha Xafiiska Adeegga Macmiilka, La-taliyaha Dhaqaale iyo Diiwaangalinta Bukaanka inay si buuxda aqoon ugu leeyihiin Siyaasaddan Kaalmada Dhaqaale, si ay galaangal ugu yeeshaan Siyaasaddan iyo sidoo kale guudmarka luuqadda sahlan ku qoran iyo foomamka Dalabka kaalmada Dhaqaale, iyo inay awoodaan inay ku jiheeyaan su'aalaha xafiiska ama wakiilka Metro ee ku habboon.

B. Metro waxay ku sababi dhammaan xubnaha shaqaalaha xidhiidhka la sameeya dadwaynaha iyo bukaanka inay si fiican ugu tabobaran yihiin macluumaadka aasaasiga ah ee la xidhiidha Shuruucdan Kaalmada Dhaqaale iyo habraacyada. Sidoo kale waxay

awood u yeelan doonaan inay ku hagaajiyaan su'aalaha la xidhiidha Siyaasaddan xafiiska ama wakiilka Metro ee ku habboon.

Qeexitaano

Hantida: Shay kasta oo qiime leh oo qofi uu leeyahay, gaar ahaan ka lacag cad loo beddeli karo. Tusaalayaashu waa lacagta cad, sikuuritiska, daymaha kaa maqan, badeecada, qalabka, guri (aan ahayn guriga aad deggan tahay), baabuur, iyo hanti kale. Ujeedooyinkan dartood, hantidu kuma jirto guriga aad deggan tahay ama hantida kale ee laga dhaafay go'aanka uu dhigayo sharciga Michigan, ama lacago kasta oo loo haysto hawlgab ahaan ama qorshayaasha hawlgabka (in kastoo qaybinaha iyo lacag-bixinaha ka yimaad qorshayaashan laga yaabo in lagu daro dakhliga qoyska ujeedooyinka shuruucdan dartood).

Kharashka Daynta Raagtay: Daymaha aan la soo xerayn (iyadoo isku-dayo macquul ah la sameeyey si loo soo xereeyo), oo ay ka baxsan yihiin habaynaha heshiiseed, ee ka imanaya ku guuldaraysiga ay bukaanadu ku guul daraysteen inay bixiyaan lacagta: (i) kuwaasi oon daryeelkooda caafimaad aan lagu darin daryeelka kaalmada dhaqaale; ama (ii) kuwaasi oo ugu qalmay kaalmada dhaqaale qaabka qiime-dhimista laakiin ku guul daraystay inay bixiyaan lacagaha ku hadhay kadib dalbashada qiime-dhimista iyadoo la raacayo shuruucdan

Qoyska: Bukaanka, lammaanihiisa (uu kujiro lammaanaha sharciga caadiga ah) iyo ku-tiirsanayaashiisa sharciga ah marka la eego xeerarka Adeegga Dakhliga Gudaha.

Dakhliga Qoyska: Wadarta dakhliyada iyo dheefaha lacagta cad ee qoyska ee sannadka kuwaasoo ka yimaada ilaha oo dhan kahor cashuuraha, laga jaray lacagaha lagu bixiyey taageerada ilmaha. Dakhliga qoyska waxa kujira mushaharrada guud, macaashka saamiyada, dulsaarka, dheefaha Sooshiyaal Sikiyuuriti, magdhawga shaqaalaha, dheefaha ruugcaddaaga, gunnooyinka tabobarka, qoondooyinka milatariga, taageerada caadiga ah ee ka timaada xubnaha qoyska ee aan qoyska la noolayn (aan ahayn taageerada ilmaha), hawlgabka dawladda, hawgabka gaarka ah, caymiska, lacagaha anuwitiga, dakhliyada kirooyinka, rooyaltiska, hantida ma-guurtada ah, tarastiyada, iyo noocyada kale ee dakhliga.

Kaalmada Dhaqaale: Dhimitaanka buuxa ama qaybta ah ee khidmadaha loo sameeyo bukaanada daryeelka xaaladda gurmadka ah ama caafimaad ahaan daruuriga ah, xaaladda marka bukaanada dhaqaale ahaan mutaystay, fikirahaan mutaystay, ama caafimaad ahaan baahan, sida shuruudahaas lagu qeexay siyaasaddan. Kaalmada dhaqaale kuma jirto daynta raagtay ama ka gaabinta heshiiseed ee barnaamijyada dawladda, laakiin waxa kujiri kara caymiska bixin-wadaagta, dhidhaktibaliska, ama labadaba.

Dhaqaale Ahaan Mutaystay: Bukaan dakhliga qoyskiisu yahay ama ka hooseeyo 250% Tilmaamaha Saboolnimada Fadaraalka, sida ku cad **Lifaaqa A** ee halkan, sida lagu muujiyey kusalaysan macluumaad dhab ah oo uu ku bixiyey bukaanku Dalabka Kaalmada Dhaqaale.

Caafimaad Ahaan Baahan: Bukaanka lagu leeyahay qaamo caafimaad ama cusbitaal kadib marka uu lacagta uu bixiyey dhinac saddexaad ay ka badnaatay 25% dakhliga sannadkii ee qoyska bukaanka, kaasi oona dhaqaale ahaan aan awoodin inuu iska bixiyo inta ku hadhsan. Bukaanada gala kharash caafimaad oo xad dhaaf ah waxa loo yaqaan caafimaad ahaan baahan marka lacagta in la bixiyo u baahato gadista hantida muhiimka

u aha nolosha ama ku keeni doonta dhibaato dhaqaale oo daran nidaamka taageerada qoyska.

Caafimaad Ahaan Daruuri Ah: Adeeg cusbitaal oo kasta oo bukaan-jiif ama bukaan-socod, oo ay kujiraan daawooyinka ama agabka uu cusbitaalku siiyo bukaanka, lagu caymiyey Medicare. Adeegyada caafimaad ahaan daruuriga ah kuma jiraan; (i) adeegyada aan caafimaadka ahayn sida adeegyada bulsho iyo xirfadeed; ama (ii) qalliimada jidhka lagu sameeyo qurxin ahaan ee ikhtiyaarka ah (ujeedooyinkan dartood, qalliinka wejiga lagu sameeyo waxa loogu talogalay inuu saxo kala-tagsanaan uu keenay dhaawac, xanuun, ama dhantaalnaanta lagu dhasho ama qaab darnaanta looma tixgaliyo "ikhtiyaar").

Qiime-dhimista Iska-Bixinta: Qiime-dhimis 40% oo la siiyo bukaanada aan lahayn caymis ama cid saddexaad oo lacag ka bixisa. Qiime-dhimista Iska-Bixinta waxa la bixiyaa isagoo beddel u ah qiime-dhimisyada la heli karo xaaladaha bukaanku u-qalmo qiime-dhimista marka la eego tilmaamaha dakhliga kusalaysan oo ku faahfaahsan siyaasaddan kuna cad **Lifaaqa A**.

Mutaystay Fikir Ahaan: Bukaan aan gudbin Codsiga Kaalmada Dhaqaale oo dhammaystiran, laakiin kaasi oo hadana ku xidhan mid ama ka badan shuruudaha soo socda:

- Bilaa Guri
- Aan looga dhiman hanti ma-guurto ah
- Maskax ahaan liita oo aan lahayn qof matali kara
- Mutaystay Medicaid, laakiin maya taariikhda adeegga ama loogu talogalay adeegyada aan la caymin
- Qoran mid ama ka badan barnaamijyada dawladda ee loogu talogalay dadka saboolka ah ee leh shardiga mutaysiga ee ah 200% ama ka hooseeya ee Tilmaamaha Saboolnimada Fadaraalka
- Ku xidhan xarun ciqaabeed

Wakiilada Metro ee tabobaran waxay si joogto ah ula fiirin doonaan shuruudaha hore bukaanada, kahor waydiinta bukaanada inay dhammaystiraan CodsigaKaalmada Dhaqaale. Metro waxa laga yaabaa inay isticmaasho barnaamijyo kale oo softiweer ah ama nidaamyo is-wada si ay u go'aamiso mutaysiga malaha ah. Bukaanada buuxiya shuruudaha hore ee mutaysiga malaha ah waxa loo qaadan inay mutaysteen qiime-dhimis 100% ah, lana waydiin maayo ama laga dooni maayo inay gudbiyaan Dalabka Kaalmada Dhaqaale. Sidoo kale, in kastoo ay jiraan tilmaamaha mutaysiga malaha ah, bukaanka ah ruugcaddaa la yaqaan ama uu oo gudbiyey bixiye ku shuqul leh Arrimaha Ruugcaddaaga wuxuu uga baahan doonaa warqad Waaxda Milatariga iyo Arrimaha Ruugcaddaaga taasi oo muujinaysa in bukaanku uu caafimaad ahaan baahan yahay taariikhda daryeelka si uu ugu qalmo kaalmada dhaqaale iyadoo la raacayo Siyaasaddan.

Guddida Oggolaanshaha Guddida Sare ee Metro Health Corporation Guddi(da) ⊿ 2/19/2019 Taariikhda

Lifaaqyada

⊿ Lifaaqa A = Tilmaamaha Kaalmada Dhaqaale

Lifaaqa A

Tilmaamaha Kaalmada Dhaqaale 2019

	Xajmiga qoyska 1			Xajmiga qoyska 2			Xajmiga qoyska 3			Xajmiga qoyska 4		
100%	$12,490.00		**$21,857.50**	$16,910.00		**$29,592.50**	$21,330.00		**$37,327.50**	$25,750.00		**$45,062.50**
95%	$12,490.00	$21,982.40	$22,482.00	$16,910.00	$29,761.60	$30,438.00	$21,330.00	$37,540.80	$38,394.00	$25,750.00	$45,320.00	$46,350.00
90%	$12,490.00	$23,231.40	$23,731.00	$16,910.00	$31,452.60	$32,129.00	$21,330.00	$39,673.80	$40,527.00	$25,750.00	$47,895.00	$48,925.00
85%	$12,490.00	$24,480.40	$24,980.00	$16,910.00	$33,143.60	$33,820.00	$21,330.00	$41,806.80	$42,660.00	$25,750.00	$50,470.00	$51,500.00
80%	$12,490.00	$25,729.40	$26,229.00	$16,910.00	$34,834.60	$35,511.00	$21,330.00	$43,939.80	$44,793.00	$25,750.00	$53,045.00	$54,075.00
75%	$12,490.00	$26,978.40	$27,478.00	$16,910.00	$36,525.60	$37,202.00	$21,330.00	$46,072.80	$46,926.00	$25,750.00	$55,620.00	$56,650.00
70%	$12,490.00	$28,227.40	$28,727.00	$16,910.00	$38,216.60	$38,893.00	$21,330.00	$48,205.80	$49,059.00	$25,750.00	$58,195.00	$59,225.00
65%	$12,490.00	$29,476.40	$29,976.00	$16,910.00	$39,907.60	$40,584.00	$21,330.00	$50,338.80	$51,192.00	$25,750.00	$60,770.00	$61,800.00
60%	$12,490.00	$30,725.40	$31,225.00	$16,910.00	$41,598.60	$42,275.00	$21,330.00	$52,471.80	$53,325.00	$25,750.00	$63,345.00	$64,375.00

	Xajmiga qoyska 5			Xajmiga qoyska 6			Xajmiga qoyska 7			Xajmiga qoyska 8		
100%	$30,170.00		**$52,797.50**	$34,590.00		**$60,532.50**	$39,010.00		**$68,267.50**	$43,430.00		**$76,002.50**
95%	$30,170.00	$53,099.20	$54,306.00	$34,590.00	$60,878.40	$62,262.00	$39,010.00	$68,657.60	$70,218.00	$43,430.00	$76,436.80	$78,174.00
90%	$30,170.00	$56,116.20	$57,323.00	$34,590.00	$64,337.40	$65,721.00	$39,010.00	$72,558.60	$74,119.00	$43,430.00	$80,779.80	$82,517.00
85%	$30,170.00	$59,133.20	$60,340.00	$34,590.00	$67,796.40	$69,180.00	$39,010.00	$76,459.60	$78,020.00	$43,430.00	$85,122.80	$86,860.00
80%	$30,170.00	$62,150.20	$63,357.00	$34,590.00	$71,255.40	$72,639.00	$39,010.00	$80,360.60	$81,921.00	$43,430.00	$89,465.80	$91,203.00
75%	$30,170.00	$65,167.20	$66,374.00	$34,590.00	$74,714.40	$76,098.00	$39,010.00	$84,261.60	$85,822.00	$43,430.00	$93,808.80	$95,546.00
70%	$30,170.00	$68,184.20	$69,391.00	$34,590.00	$78,173.40	$79,557.00	$39,010.00	$88,162.60	$89,723.00	$43,430.00	$98,151.80	$99,889.00
65%	$30,170.00	$71,201.20	$72,408.00	$34,590.00	$81,632.40	$83,016.00	$39,010.00	$92,063.60	$93,624.00	$43,430.00	$102,494.80	$104,232.00
60%	$30,170.00	$74,218.20	$75,425.00	$34,590.00	$85,091.40	$86,475.00	$39,010.00	$95,964.60	$97,525.00	$43,430.00	$106,837.80	$108,575.00

* Ku dar $4,420 qof kasta oo dheeraad ah oo ka badan 8 qof qoys ahaan

** Boqolleyda qiime-dhimista hore waxa loo sameeyey qaab loogu talogalay in la raaco sharciga Fadaraalka ee khuseeya, kaasi oo dhigaya in Metro laga yaabo inayna qaandhabin bukaan mutaystay kaalmo dhaqaale oo ka badan xaddiyada sida qaalibka ah ay ku soo dallacdo ("AGB") Metro bukaanada leh caymiska daryeelka noocan ah. Metro waxay u xisaabisaa AGB-geeda iyadoo isticmaalaysa habka dib-u eegista ee ku cad Qawaaniinta Qasnajiga khuseeya, iyadoo tixagalinaysa lacagaha ay bixiyaan Medicare iyo bixiyayaasha ganacsi. Xisaabinta noocan ah waxay keentay waxa soo socda:

Wakhtiga cabbiraadda Julaay 1, 2017 – Juun 30, 2018
AGB 40%

Metro dib ayey u xisaab doontaa AGB-geeda muddadiiba (iyo ugu yaraan sannadkiiba) oo, iyadoo halkaas ka duulaysa, waxay habayn doontaa boqolleyda qiime-dhimista sare ku cad. Habaynta noocan ah waxa lagu saamayn doonaa dib u eegis iyadoo la marsiinayo kan **Lifaaqa A**, kaasi oo uu saxeexi doono taariikhayna doono Madaxa Maaliyadda Metro.

Saxeexay:_____

Magaca Daabac:_____

Taariikhda:_____